




Heyb Sooca Guryaha

Housing Discrimination

Waa maxay noocyada heybsooca ee sharci darada ah?

Minnesota, shaqaalaha guryaha kuulama dhaqmi karaan si ka duwan sida dadka kale taasoo ay ugu wacan tahay:

- Qowmiyadaada (*oo ay ku jirto timo-jarka caadiga ah*)
- Xaaladda qoyska (in aad caruur ama uur leedahay)
- Naafanimada
- Jinsiga
- In aad qaadato gargaarka dadweynaha (MFIP, GA, SSI, iwm)
- Halka aad asal ahaan ka soo jeedo
- Midabka
- Doorashada jinsiga ee qofka
- Da'da (St. Paul kaliya)
- Diinta
- Aqoonsiga jinsiga
- Caqiidada (aaminsan tahay)
- Xaaladda guurka (*soolane, xaas ah, la soo furay, kala bixid, ama laga dhintay*)



Minneapolis waxa ay leedahay kuwa kale: (*Minneapolis kaliya*)

- Dhererka
- Culayska
- Xaaladda dhanka hoyga (haddii aad hoy la'aan tahay ama horey aad u ahaan jirtay hoy la'aan)
- Xaaladda dambiyo gaysi (haddii horey dambi laguugu helay ama aad leedahay taariikh dambi, iyadoo qaar laga reebo taa)

Waa maxay qaar ka mid ah calaamadaha haybsooca dhici kara?

Diidmada in lagu siiyo codsiga

- Marka aad telefoonka ku soo wacdo, guryo ijaar ah wey hayaan. Laakiin marka ay arkaan midabkaaga waxa ay yiraahdaan "waa la kireystay."
- Kireeyaha oo yiraahda "kama kireyneyno MFIP" ama "kama kireyneyno gargaarka degdegga ah." Minneapolis, qolo guri ma diidi karto codsigaagga waayo uun inaad haysato Section 8 ama aad hesho kaalmo dhanka guryaha ah.
- Waa lagu diiday naafanimadaadu darteed, inkasta oo naafanimadaadu aysan kaa hor istaageyn in aad raacdo heshiiska kirada. Akhri xogta urursan ee [U Fududeynta Suuro Galka Ah: Ma Dooneysaa In Kireystuhu Sameeyo Isbedel Waayo Waxa Aad Tahay Qof Naaf Ah.](#)

- Kiraayaha oo yiraaha “caruur lama ogola ”laakiin aysan aheyn guryaha dadka da’da ah u gaarka ah.
- Maamulaha guryaha oo si kala duwan ula dhaqma dadka. Tusaale ahaan, iyaga oo u sheega dadka la siiyo MFIP in laga doonayo in dakhliga soo gala uu 3 jeer ka badan yahay kirada, laakiin sidaas uma sheegaan dadka aan la siin gargaarka dawladda.
- Codsigaaga marna lagama shaqeeyo diintaada darteed.

Hab dhaqan kala duwan

- Daryeelaha guriga oo dayactirka guryaha ku horeeya dadka caddaanka ah ka dibna dadka laatiinka ah.
- Maamulaha oo dadka sharciyada si kala duwan ugu fuliya ama ijaar dheeraad ah ka qaada dadka midabka leh.
- Kireeyuhu ma ogola inuu isbedel yar ku sameeyo sharciyada si dadka naafada ah si wanaagsan ugu noolaadaan guriga. Tusaale ahaan, u ogolaashaha xayawaanka guri jooqta ee wehelka u ah. Akhri xogta urursan ee ku saabsan [Ma Haysan karaa Xayawaan?](#)
- Xafiiska maamula guryaha oo aan kuu ogoleyn in aad guriga ku rakibto wadada uu guriga ku galo gaariga dadka naafada ah. Akhri xogta urursan ee [U Fududeynta Suuro Galka Ah: Ma Dooneysaa In Kireystuhu Sameeyo Isbedel Waayo Waxa Aad Tahay Qof Naaf Ah](#)
- Waxaa jira sharciyo gaar ah oo caruurta khuseeya,ama maamulaha ayaa ka kireeya dabaqa koowaad qoysaska caruur wadata.



Qashqashaad

- Daryeelaha guriga ayaa kugu khasba in aad wada sheekeysataan oo iska soo gala gurigaaga markii uu doono. Akhri xogta urursan ee [Khashkhashaada Galmada Mulkiilaha Gurigu uu Rabo.](#)
- Ilaalada dhismaha ayaa dadka ku soo booqanaya si kale ula dhaqmo maadaama ay yihiin Indiyaan Ameerikaan.
- Xaafadaha deriska ayaa kugu cadaadiya in aad xaafadda ka guurto iyaga oo kuugu yeera magacyo xunxun.

Maxaan ka qaban karaa?

Haddii lagu diido in guri lagaa kireeyo oo aad tuhunsan tahay in tahay mid heyb sooc ku dhisan, soo wac lambarka hoos ku xusan sida ugudhaqsaha badan.

Waxa kale oo aad yeeli kartaa in saaxiibkaa uu la xiriiro kireeyaha oo aad aragto sida uu ula dhaqmo qofkaas. Tusaaale ahaan: haddii aad aaminsan tahay in heyb soocu yahay mid ku dhisan qowmiyad, fiiri haddii qof qowmiyad kale soo jeeda loola dhaqmo si ka wanaagsan sida laguula dhaqmay. Qor waxa dhaca mar kasta oo adiga iyo saaxiibkaa aad la hadashaan.

Haddii si xun laguula dhaqmay ama lagugu qashqashaado meesha aad degan tahay, mulkiilaha waraaq u qor. nuqul (koobi) ka reebo. Iyo cadeynta heybsooca lagugu sameeyey. Isku day in aad goobjoogayaal ka markhaati geliso oo aad heysato halka lagala xiriir karo. Qoraal ka samee mar kasta oo wax dhacaan. Haddii ay naftaadu khatar ku jirto, caawinaad weydiiso.

Dacwad Iyo Cabashada Hay'adda

Waxa aad furi kartaa dacwad aad ku joojiso heyb sooca oo mararka qaarkood aad ku heli kartaa magdhaw lacageed. Haddii aad dooneyso talaabo degdeg ah oo laga qaado guriga lagu diiday, lagu joojiyo qaashqashaadda, ama aad kaga hortagto in guriga lagaa saaro, dacwad aad maxkamadda ka furto ayaa ah xalka ugu wanaagsan. Haddii uu dakhligaagu yar yahay, la xiriir xafiiska Legal Aid 1-(877) 696-6529. Ama ka eeg caawimaad barnaamijyadda kale ku jira barta: www.lawhelpmn.org/so/providers-and-clinics.

Waxa kale oo aad caawinaad weydiisan kartaa hay'adaha dawladda ee looga dacwodo sharciyada heyb sooca guryaha Waxa ay baaritaanka sameeyaan iyaga oo aan wax lacag ah kaa qaadin. Haddii ay ogaadaan inuu heyb sooc jiro, waxa ay eegayaan haddii heshiis la gaari karo. Haddii aan la gaarin wax heshiis ah, waxaa suurogal ah in ay hay'addu dacwad furto oo liddi ku ah qofka heybsooca geystay. Hay'daha waa kuwo hoos ku xusan:

Minneapolis Civil Rights Department

City Hall - 350 S. Fifth St., Room 239
Minneapolis, MN 55415

Phone: [612-673-3012](tel:612-673-3012)

Or call 311

Email: civilrights@minneapolismn.gov

Website: [Civil Rights - City of Minneapolis](http://www.minneapolis.gov/civilrights)

MN Department of Human Rights

Griggs Midway Building
540 Fairview Ave North, Suite 201
St. Paul, Minnesota 55104

Telefan: (651) 539-1100

MN Relay: 711 or 1-(800) 627-3529

Khadka ka gargaarka takoorka (helpline): 1-(833) 454-0148

Iimaylka ah: info.mdhr@state.mn.us shabakada (website) ah: www.mn.gov/mdhr/

Housing and Urban Development (HUD)

Minneapolis Field Office
212 Third Ave South, Suite 150
Minneapolis MN 55401

Telefan: (612) 370-3000

TTY: (612) 370-3186

Housing and Urban Development (HUD)

Ralph Metcalfe Federal Building
77 West Jackson Boulevard, Suite 2600
Chicago, IL 60604-3507

Telefan: (800) 669-9777

TTY: (312) 353-7143

Labada xafiisba: www.hud.gov. Waxa kaliya oo aad ka xareysan kartaa ashtako HUD adigoo adeegsanaya shabakadooda (website).

Wax kasta oo aad sameyso, dhaqso ugu dhaqaaq. Xaaladaha qaarkood, waxa aad u baahan tahay in aad cabasho ama dacwadaada soo gudbiso 1 ama mararka qaarkood 2 sano gudahood.

Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MAAHA taloxagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambaysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.